Raadinta Sunta Rasaasta ee Guriga
Waa Maxay Sunta Rasaasta?

Sunta Rasaasta waa qeyb aduunkeena maanta ka mid ah. Waxaa laga helay hawada, carad madow, busta iyo renjiga qaar ka mid ah guryaha iyo dhismooyinka la dhisay 1978dii ka hor. Waxaa la soo ogaaday sunta rasaasta in dhibaatooyin badan u gaysanayso caafimaadka. Sunta rasaasta kuma noqonin weligeeda qeyb caadi ah jirkaaga. Wararka fiican waxa weye in sunta rasaasta laga hortagi karo. Warqddaan waxa ay ku siinaysaa jawaabaha qaar ka mid ah su'aalaha caadiga ah ee la is-weydiiyo ee ku saabsan sunta rasaasta.

Sidee Aniga ii soo gaaraysa sunta rasaasta?
Sunta rasaasta waxay galaysaa jirkaaga waqti kasta adigu aad ku neefsatid boodhka sunta rasaasta ama qaaca, ama aad liqdo wax ka kooban sunta rasaasta.
La kulanka sunta rasaasta waxay u dhici kartaa qaabab kala duwan:

- Cunida raashin ama cabitaan biyo ay ku jiraan sunta rasaasta.
- Joogitaanka waqti dheer meelaha sunta rasaasta ee renjiga ku jirta.
- Ka shaqeynta meesha sunta rasaasta loo isticmaalay.
- Isticmaalka daawooyinka dhaqanka ee ku jiraan sunta rasaasta.
- Ka qeyb-qaadashada waxa lagu raaxaysto ee loo isticmaali karo sunta rasaasta, sida samaynta muraayada daaqadaha ee leh sunta rasaasta ama in kaluunka lagu qabto jilaab leh sunta rasaasta.

Sidee sunta rasaasta u wax-yeeleyneysaa dadka waa-weyn?
Wax-yeelada sunta rasaasta waa isku si haddii jirka ka soo gasho dhanka neefsashada ama liqida. Bar-tilmaameedka ugu muhimsan ee jirka ku sumoobo sunta rasaasta waxa weye qeybta dareemayaasha jirka. Waqti-dheer iyo heerka-sare ee iska dabooli la'aanta dadka waa-weyn sunta rasaasta waxay sabab u noqon karta dhaawaca maskaxda iyo keliyaha. Iska dabooli la'aanta heerka-sare ee sunta rasaasta raga iyo dumarkaba waxay dhaawici karta caafimaadka unugyada taranka (dhalmada). Haweenka uurka leh ee ay soo gaarta sunta rasaasta waxaa ku kordhi kara khatar ugu timaada in ay hore u soo dhiciso cunugeeda, iyo in ay dhasho cunug miisaankiisa yar.

Sidee sunta rasaasta u wax-yeelaysaa caruurta?
Caruurta waxa yihiin kuwo dadka waa-weyn kaga sahalsan in ay helaan sunta rasaasta sababta oo ah xubnaha dareemada jirkooda oo weli soo korayaan. Caruurta jirkooda wuxuu aad u nuuga sunta rasaasta ee ay ayagu qaadanayaan in ka badan dadka waa-weyn jirkooda. Cunuga markaa dhashay iyo caruurta yar-yar waxay ka liqi karaan ama ku neefsan karaan sunta rasaasta ka soo gaaraysa taabashada wasakhda, busta, ama bacaadka marka ay ku cayarayaan sagxadda dhulka ama dabakha-dhulka. Hawlahan waxay u sahlayaan caruurta in ay noqdaan kuwa soo gaarto sunta rasaasta sababta oo ah gacmahooda oo leh wasakh iyo bus, qalabka caruurta ku cayaaraan, ama alaabo kale oo ka kooban sunta rasaasta. Caruurta waxay kaloo ay yihiin kuwo ugu nugul badan dadka waa-weyn wax-yeelada sunta rasaasta. Xataa heerarka ugu hooseeya ee soo gaaritaanka, sunta rasaasta waxay wax-yeeleyn kartaa wxabarashada caruurta, dabeecada iyo koriinka.

Sidee baan u sheegi karaa haddii ilmahayga/xubin ka tirsan qoyskayga wax badan oo sunta rasaasta ah ay ku jirto jirkooda?
Dadka jirkooda ku jirto sunta rasaasta oo heer wax badan ah inta badana ay ka muuqanin wax jiro ah. Calaamooyinka lagu garanayo waxay noqon karaan kuwo guud ahaan waxayna u dhici karaan sababo badan. Sidaas awgeed, wadada keliya ee lagu garanayo waa haddii ay sunta rasaasta wax aad u badan ku jirto dhiiga waxa weye in dhiiga laga qaado baaritaan. Isbitaalka xaafadaada ee caafimaadka bulshada ama dhakhtarka u qaabilsan qoyska ayaa kuu samayn karaa baaritaan dhiiga. Waxaa ka mid ah ayadoo baaritaanka dhiiga laga qaadayo farta xubin ka tirsan qoyskaaga ama xididka gacanta. Haddii baaritaanka dhiiga lagu arko dhibaato la xiriirta sunta rasaasta, baaritaano kale ayaa laga yaaba in la sameeyo.

Ma jiraan hab lagu yareynayo heerka sareeya ee sunta rasaasta dhiiga ku jirto?
Habka ugu wanaagsan ee lagu yareyn karo heerka sunta rasaasta dhiiga ku jirto waxa weye ka hor-tagidda helida sunta rasaasta ee joogtada ah. Waxaa jirtaa daaweyn caawinayso in ay sunta rasaasta ka baxdo jirka marka heerka sunta rasaasta ay aad u sareeyso. Daaweynta waxay ku darsamaysa sunta rasaasta sidaas daraadeed jirka wuxuu si fudud ayuu iskaga saari karaa sunta rasaasta. Dhakhtar ayaa go'aan ka gaari doona haddii daaweyntan loo baahan-yahay.

Yaa Lagu Samaynaya Baaritaanka

Waaxda Caafimaadka Minnesota (MDH) waxay horumarisay Heerarka u Degan Baaritaanka Sunta Rasaasta Dhiiga ku jirt ee Minnesota (Blood Lead Screening Guidelines for Minnesota) si ay u caawiso dhakhaatiirta in ay amraan cida laga qaadayo baaritaanka sunta rasaasta, muddo intee baana u dhaxaysa baaritaanada. Talooyinkaan waxaa ku jiraan:

Dhakhtarka waa in uu go'aamiya caruurta u baahan baaritaanka dhiiga ee sunta rasaasta da' kasta haddii:

- Waalidka uu muujiyo walaaca ku saabsan arintan, ama uu weydiiyo baaritaanka sunta rasaasta dhiiga ku jirto ee caruurtooda;
- Caruurta ka soo guureen nawaaxiga magaalooyin waa-weyn ama wadan kale laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay gudahooda.

Bixiyayaasha daryeelka-Caafimaadka Caruurta waa in ay ugu deeqaan baaritaanka sunta rasaasta dhiiga ku jirto caruurta jirta hal iyo laba sano, iyo caruurta ilaa lix jirka ah kuwa soo dhowaan aan laga qaadin baaritaanka haddii:

- Ilmaha uu ku noolyahay Minneapolis ama St. Paul; **AMA**
- Ilmaha ay ka soo helaan adeegyada barnaamijyada kaalmada sida WIC, Medicaid, MinnesotaCare, ama Prepaid Medical Assistance Programs (Barnaamijyada Hor-u-bixinta Kaalmada Caafimaadka); **AMA**
- Ilmaha uu la kulmo mid ka mid ah arimo kasta soo socda, waxaana ku jiraan: booqashada caadiga ah ee guriga, daryeelka caruurta, ama dhismo kale ee la dhisay 1950kii ka hor ee lixda bilood ee ugu dambayey; booqashada caadiga ee guriga, daryeelka caruurta, ama dhismo kale ee la dhisay 1978dii ka hor kaa soo ay ku socoto cusboonay-siin, dib u-habayn weyn, ama wax-yeelo soo gaartay lixda bil ee ugu dambaysay; ama ilmaha uu leeyahay walaalo, wehel la ciyaaro, ama wehel guriga la degan oo heerka sunta rasaasta dhiiga ku jirta ee jirkiisa ay sareeyso.

Bixiyaha daryeelka caafimaadka waa in uu ku sameeya qiimayn sanadeedka caruurta da'dooda ay tahay saddex ilaa lix sanadood ee dhowaanahan heerarka sunta rasaasta dhiiga ku jirto ay tahay "caadi" si loo go'aamiyo haddii wax is-baddel ku yimaaday degaankooda. Haddii jawaab kasta oo soo socota ay tahay "Haa" ama "Ma garanayo", ilmaha waa in uu helaa baaritaanka sunta rasaasta dhiiga ku jirto:

- Ma leeyahay ilmaha wehel la ciyaara, walaal ama wehel guriga la degan ee dhowaan heerka sunta rasaasta dhiiga ay sare u kacday?
- Ma u guuray ilmaha ama ma bilaabay booqasho caadi ee guri, daryeelka caruurta, ama dhismo kale ee la dhisay 1950kii ka hor?
- Ma jireen wax dayactir ah, dib u-hagaajin, ama wax-yeelo (sida wax-yeelo ka soo gaartay biyo ama gabalada renjiga), daryeelka caruurta, ama dhismayaal kale oo la dhisay 1978dii ka hor kaa soo ilmaha si caadi ah u soo booqanayey?

Warbixin dheeraad ee ku saabsan Heerarka Baarista Sunta Rasaasta Dhiiga ku jirta ee Minnesota iyo warbixin kale ee ku saabsan sunta rasaasta fadlan kala xiriir Barnaamijka Sunta Rasaasta ee MDH www.health.state.mn.us/divs/eh/lead ama taleefoonka 651-201-4610.

Si aad u codsatid alaabadaan oo ku qoran qaab kale waxa aad kala xiriirtaa:

Minnesota Department of Health
P. O. Box 64975.
St. Paul, MN 55076-0975
Taleefoon: 651-201-5000
MDH TDD/TTY: 651-201-5797
Adeegyada war-gudbinta Minnesota: 800-627-3529

Waxaa lagu daabacay warqado dib loo warshadeeyey. Revised 1/2006 IC #141-1350
(What is Lead Poisoning – Somali)

Su'aalo?
Ka wac Barnaamijka Sunta Rasaasta ee Waaxda Caafimaadka Minnesota 651-201-4610 ama waxa kaloo aad booqataa weebsaayitkayna. www.health.state.mn.us/divs/eh/lead